

# Shaqaalaha uurka leh iyo waalidiinta cusub

## SHAQADA QOFTA UURKA LEH

Haddii aad uur leedahay, waxaad xaq aad u leedahay inaad codsato oo loo shaqeeyahaagu uu ku siyo:

- musql aadis badan ama dheer, nasashada cunto iyo biyaha;
- fadhiisi; iyo
- xaddidaad qaadista wax ka badan 20 rodol.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato beddelaado kale oo goobta shaqada ah marka ay ku siiso talo daryeele caafimaad ama umulisho. Loo shaqeeyahaagu kama dalban karo inaad wax ka bedesho xaaladahaaga shaqo sababtoo ah waxaad leedahay uur.

## UURKA IYO KA MAQNAANSHAH

### SHAQADA EE WAALIDKA

Shaqaaluhu waxay codsan karaan oo ay qaadan karaan ilaa 12 toddobaad oo fasax lacag la'aan ah inta ay uurka leeyihiin ama marka ay dhalaan ama soo korsanayaan ilmahooda. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin fasaxan iyada oo aan loo eegin inta uu leeyahay xajmiga loo shaqeeyuhu ama inta wakhtiga ay u shaqeeyeen loo shaqeeyaha.

Uurka iyo fasaxa waalidka waxaa loo qaadan karaa:

- awood la'aan uur ama xaalado caafimaad oo la xiriira darteed;
- ilmo dhalida ama korsashada; ama
- wakhtiga isku xirka/isbarashada ee waalidka dhalay ama aan dhalin dhalashada ama korsashada ilmaha kadib.

Loo shaqeeyeyaashu waxay qaadan karaan xeerar macquul ah oo ku saabsan marka codsiyada fasaxa la sameeyo oo fasaxa waa in la qaataa 12 bilood gudahooda dhalashada ama korsashada.

Waxaa laga yaabaa inaad isticmaasho nacfiyada uu bixiyo loo-shaqeeyuhu, sida fasaxa jirrada ama fasaxa naafada, haddii aad jirran tahay xilliga uurka ama si aad uga soo kabato dhalmada kadib.

Sharciga fasaxa qoyska iyo caafimaadka ee Minnesota, kaas oo bixiya wakhti fasax ah inta lagu jiro ama kadib uurka, wuxuu dhaqan galaa Janaayo 1, 2026.



## CAANO ISKA LISIDDA SHAQADA

Haddii aad go'aansato inaad caano iskaga listo shaqada, loo shaqeeyahaagu, iyadoon loo eegin baaxadda, waa inuu bixiyaa:

- wakhtiyada nasashada si aad caano isaga listo adioo aan lumin lacagsiinta; iyo
- meel nadiif ah, gaani ah oo ammaan ah oo aad ku listo caanaha oo:
  - aan ahayn musql;
  - ka daahsoon aragga;
  - ka madax bannaan faragelinta shaqaalaha iyo dadweynaha;
  - meel u dhow goobta shaqada; iyo
  - meel leh bareesada korontada.

Waxaa laga yaabaa inay jiraan waxyaabo xaddidan oo ka reeban shuruudahan.

Waxaad dooran kartaa goorta aad caanaha iska lisayso iyadoo ku salaysan baahidaada, hadday taasi ka dhigan tahay inaad caanaha iska listo xilliga inta lagu jiro fasax lacag leh oo jira, xilliga nasashada aan lacag lahayn, sida nasashada cuntada, ama wakhti kale.

Waa sharci darro in loo shaqeeyahaagu uu ka aargoosto, ama uu qaado tallaabo diidmo ah, oo lid ku ah codsigaaga ama qaadashada fasaxa, u fududaynta uurka ama iskaga lisida caanaha goobta shaqada.

## NALA SOO XIRIIR

Halbeegyada Shaqada 651-284-5075 ama [dli.laborstandards@state.mn.us](mailto:dli.laborstandards@state.mn.us).



Labor Standards • 443 Lafayette Road N. • St. Paul, MN 55155  
651-284-5075 • [dli.mn.gov](mailto:dli.mn.gov) • [dli.laborstandards@state.mn.us](mailto:dli.laborstandards@state.mn.us)